



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
Ministry of Internal Security

Taariikh: 24/ 03/ 2020

WAR SAXAAFADEED:

Wasaaradda Amniga Gudaha, Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay bulshada la wadaagaysaa in uu yahay wax kama jiraan eedaha lagu xusay qoraal lagu sheegay in qaar kamid ah hay'adaha amniga ay abuubuleen weerar ka dhan ah Madaxweynihii hore Mudane, Shariif Sheekh Axmed.

Wasaaraddu waxay caddeynaysaa in Madaxweynaha haatan xilka haya iyo labadii Madaxweyne ee ka horreysay ay dhammaantood amnigooda sugaan askar ka wada tirsan ciidanka Ilaalada Madaxtooyada Qaranka, sidaas daraadeedna aysan suurtagal ahayn wararka haatan la faafinayo.

Waxaanu adkeynaynaa in Madaxweynayaashii hore Mudane Shariif Sheekh Axmed iyo Xasan Sheekh Maxamuud ay yihiin Madaxweynayaal dalkan ka soo samata-bixiyey marxalad adag, qarankana ay ku leeyihiin tixgelin gaar ah, amnigooduna uu yahay waajib qaran oo ay u heellan yihiin ciidamada loo igmaday ilaalinta Madaxda Qaranka soo martay.

DFS waxay ka digeysaa ficillada xun iyo wararka been abuurka ah ee ay shakhsiyaad la garanayo ku doonayaan in ay dano siyaasadeed uga maacaashaan wararka aan sal iyo raadka toona lahayn.

DHAMMAAD